


← **COTA** Kaalmo



Kaarkaan Tilmaamaha ayaa ku tusaaya sida loo iibsado bas raacyada COTA. Waxaad baran doontaa kaararka kaladuwan ee aan bixino iyo qaababka badan ee aad ku bixin karto qarashka raacista COTA. Guji "Next Card (Kaarka Xigga)" ee hoose si aad u biloowdo!

🔊 Dhagayso

← Kaadhka Hore Kaadhka Xigga →

Xaga 1 of 18

**XAGA 1 OF 18**

← **COTA** Kaalmo





Hal dookh waa inaad bixiso lacagta halka safarka adoo adeegsanaaya lacag kaash ah ama shilimaad ah. Waxaad dhiibi kartaa \$2.00 marka aad raacdo Gaariga COTA. Waa qasab inaad bixiso cadad lacagta oo go'an. Ku rid shilimaadka ama lacagta sanduuqa lacagta bas raaca. Lacagta bas raaca ee dhan \$2.00 waxaad ku raaci kartaa keliya hal safar. Waxaa sidoo kale ku jira u kala wareegga dhammaan gaariyaasha COTA ee mudada labada saacadood ah. Ka codso Darawalka Gaariga warqada kala wareegga marka aad iibsato tigidhka baska.


🔊 Dhagayso

← Kaadhka Hore Kaadhka Xigga →



Xaga 2 of 18



**XAGA 2 OF 18**


 **COTA**  Kaalmo



Haddii aad u baxayso safar kaladuwan isla maalinta, Tigidhka Maalinta oo dhan ayaa ah dookh wanaagsan. Tigidhka maalinta oo dhan qiimihiisu waa \$4.50. Waxaa laga iibsan karaa gaariga adoo kaashka ku ridaaya sanduuqa lacagta baska.

  **Dhagayso**

 **Kaadhka Hore** **Kaadhka Xiga** 

Xaga 3 of 18 

**XAGA 3 OF 18**

 **COTA**  Kaalmo



Haddii aad si joogto ah u safrayso asbuuca iyo bisha oo dhan, Tigidhka 31 Maalmood ah ayaa dookh wanaagsan kuu noqon kara. Tigidhka 31 Maalmood qiimihiisu waa \$62.00. Tigidhkaan ayaa ku siinaaya inaad bilaa xadidaad ku raacdo gaariyaasha COTA muddo 31 maalmood ah kadib safarkaaga koobaad.

  **Dhagayso**

 **Kaadhka Hore** **Kaadhka Xiga** 

Xaga 4 of 18 

**XAGA 4 OF 18**

← **COTA** Kaalmo



Waxaad ka iibsan kartaa Tigidhada Halka Safar, Maalinta dhan ama 31 Maalmood Xarunta Adeegyada Macaamiisha oo ku taala 33 N. High St. Xaruntu waxay furan tahay Isniinta-Jimcada, 8 subaxnimo ilaa 5 galabnimo. Waxaad lacagta ku dhiibi kartaa kaash, kaarka daynta ama jeeg.

🔊 Dhagayso

← Kaadhka Hore Kaadhka Xiga →

Xaga 5 of 18

← **COTA** Kaalmo






Si aad u adeegsato tigidhkaaga, waa inaad marka hore ka shaqeysiisaa adoo gelinaaya sanduuqa lacagta basraaca la geliyo. Kadib marka Tigidhka Maalinta ama 31 Maalmood ah laga shaqeysiiyo, waxaad mashiinka marinaysaa tigidhka marka aad raacayso gaariga COTA.

🔊 Dhagayso



← Kaadhka Hore Kaadhka Xiga →



Xaga 6 of 18

 **COTA**  Kaalmo






Qaab kale oo aad ku bixinayso lacagtaada bas raaca waa inaad adeegsato Smartcard.

  Dhagayso


 Kaadhka Hore  Kaadhka Xiga

Xaga 7 of 18

 **COTA**  Kaalmo




Waxaad COTA Smartcard ka soo qaadan kartaa Xarunta Adeegga Macaamiisha oo ku taala 33 N. High St. Xubin kamid ah Kooxda COTA ayaa kaa caawin doona furashada koonto. Waxa keliya ee aad u baahan tahay waa ciwaan iimeyl si aad u diwaan geliso koontadaada. Koontadu waa lacag la'aan.

  Dhagayso

 Kaadhka Hore  Kaadhka Xiga

Xaga 8 of 18

← **COTA** Kaalmo




Marka aad isku diiwaan geliso kaarkaaga Smartcard, waxaad intaas kadib ku shuban kartaa lacag koontadaada. Booqo passes.COTA.com. Raac tilmaamaha talaabo-talaabada ah si aad u furato koonto aadna ugu shubato lacag. Waxaad sidoo kale sidaan ku samayn kartaa Xarunta Adeegga Macaamiisha.

↻ **Dhagayso**

← Kaadhka Hore **Kaadhka Xiga** →

Xaga 9 of 18

← **COTA** Kaalmo




Si aad u adeegsato kaarkaaga Smartcard, ku taabo kaarka mashiinka xaqiijinta. Mashiinka xaqiijinta ayaa ku ooli doona dhankaaga midig marka aad baska fuulayso.

↻ **Dhagayso**

← Kaadhka Hore **Kaadhka Xiga** →

Xaga 10 of 18

← **COTA** Kaalmo




Haddii aad dooneyso inaad bixiso qarashka adoo adeegsanaaya taleefankaaga casriga ah, waxaad sidaan ku samayn kartaa abka Transit. Kasoo degso ablikeeshinka Apple App Store ama Google Play.

🔊 Dhagayso

← Kaadhka Hore Kaadhka Xiga →

Xaga 11 of 18

← **COTA** Kaalmo






Shaashada hore ee ablikeeshinka Transit, taabo "Buy (libso)." Kadibna dooro "Pay with your mobile phone (Ku bixi lacagta moobilkaaga)."

🔊 Dhagayso



← Kaadhka Hore Kaadhka Xiga →




Xaga 12 of 18


  Kaalmo





Kadibna, mar tallaabooyinka rakibaaa koontada ee loo baahan. Kadib marka aad dhamayso rakibaada koontadaada, waxaa lagaa codsan doonaa haddii aad dooneyso kaarka daynta in lagu xiro koontadaada.


  Dhagayso

 Kaadhka Hore  Kaadhka Xiga 



Xaga 13 of 18 




**XAGA 13 OF 18**


  Kaalmo



Haddii aad dooneyso inaad lacag ku darto kaarkaaga daynta, geli xogtaada. Kadibna dooro cadadka lacagta aad ku shubayso koontadaada. Xaqiiji cadadka. Kadibna dooro "Proceed to payment (Sii wad lacag bixinta)." Kadibna dooro "Place order (Dir dalabka)."


  Dhagayso

 Kaadhka Hore  Kaadhka Xiga 

Xaga 14 of 18 

**XAGA 14 OF 18**

← COTA Kaalmo



Location	Phone Number
Continental Expressway Center & Busstop Services	
35 North High Street, Columbus, 43215	614-228-2776
<b>Fixed-Route Buses</b>	
Easton Transit Center, 4300 Easton Road, Columbus, 43230	614-228-2776
35 North High Street, Columbus, 43215	614-228-2776
South Terminal, 6th St., Columbus, 43215	614-228-2776
John Glenn International Airport (Terminals), 4800 International Gateway, Columbus, 43219	614-228-2776
Spring Street Terminal, 35 W. Spring St., Columbus, 43215	614-228-2776
Northland Transit Center, 3400 Cleveland Ave., Columbus, 43221	614-228-2776
<b>Major Locations (24hr-24/7)</b>	
3705 N. High St., Columbus, 43202	614-294-5884
2800 Crown Plaza, Columbus, 43228	614-294-5884
2000 E. Main St., Columbus, 43208	614-294-5884
3800 Solon Road, Columbus, 43230	614-294-5884
3417 N. High St., Columbus, 43214	614-294-5766
2800 Easton Rd., Columbus, 43230	614-294-7717
100 Cleveland Blvd., Columbus, 43211	614-294-5884
3800 W. Henderson Rd., Columbus, 43226	614-467-5855


Waxaad sidoo kale lacag ku shuban kartaa koontadaada adoo adeegsanaaya kaash aad gaynayso midkood 400 ee xarumood ee tafaariiqda. Booqo <https://COTA.com/riding-cota/buying-passes/> si aad u hesho liiska goobaha tafaariiqda.

🔊 Dhagayso

← Kaadhka Hore Kaadhka Xiga →

Xaga 15 of 18

← COTA Kaalmo





Goobta tafaariiqda, waxaa lagaa codsan doonaa inaad doorato "Vida Pay" ama "Vanilla Direct." Qasnad hayaha ayaa kaa caawin kara xulashada adeeg bixiyaha saxda ah. Wuxuu iskaanka marin doonaa koodhkaaga QR ka ama koodhka iibka kadibna lacagta ayuu kuugu shubayaa.



🔊 Dhagayso

← Kaadhka Hore Kaadhka Xiga →



Xaga 16 of 18






 **COTA**  Kaalmo







Marka gaariga COTA uu yimaado, fur ablikeeshinka Transit kadibna taabo "Ride now (Hadda Raac)." Koodhka QR ayaa kasoo muuqanaaya abka.

  **Dhagayso**



 Kaadhka Hore **Kaadhka Xiga** 



Xaga 17 of 18 

 **COTA**  Kaalmo



Iskaanka mari koodhka QR adoo adeegsanaaya mashiinka xaqijinta ee dhankaaga midig marka aad raacayso gaariga. Sug nalka cagaaran oo muujinaaya in lacagtaada bas raaca la aqbalay.

  **Dhagayso**

 Kaadhka Hore **Waan Dhameeyay** 

Xaga 18 of 18 